

Qorshaha Waxbarasho ee Ammaanka ah ee Loogu Talagalay 2020-21

Hab ku Salaysan Deegaanka, oo ay Hagayso Xogtu

Hagaha Qoyska ee Qorshaha Waxbarasho ee Ammaanka ah ee Minnesota ee Sanad dugsiyeedka 2020-21

Hab ku Salaysan Deegaanka, oo ay Hagayso Xogtu

Bishii Luulyo 30, 2020 Guddomiye Tim Walz wuxuu inala wadaagay Qorshaha Waxbarasho ee Ammaanka ah ee Minnesota kaas oo u baahan dhammaan iskuullada dadweynaha ee Minnesota inay waafaqaan heerarka caafimaadka bulshada ee ay dejisay Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) markay dooranayaan ama beddelayaan nooca habka waxbarashada ee iskuulka. Waaxda Waxbarshada ee Minnesota (MDE) waxay u samaysay saddex nooc oo habka waxbarashada ah oo loogu tala galay iskuullada qof ahaan in wax lagu barto, waxbarashada isku dhafan ama wax ku barashada masaafada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan moodeeladan ayaa waxaa laga heli karaa Hagitaanka loogu Talagalay Qoysaska - u Qorshaynta Sanad Dugsiyeedka 2020-21.

Inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2020-21, degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ku waxay la shaqayn doonaan MDH iyo MDE si loo go'aamiyo nooca habka waxbarasho ee ugu fiican ammaanka ardayda, shaqaalaha iyo bulshada.

Dhamaan iskuullada degmooyinka iyo iskuullada charter-ku waa in ay siiyaan ikhtiyaarka wax ku barashada masaafada dhamaan qoysaska doorta in aysan waxbarashada shakhsi ahaan u imaanin sababo la xiriira halis caafimaad ama walwallo kale oo xaga ammaanka ah. Qoysaska loogama baahna inay keenaan caddaynta halista.

Qoysasku waa inay la xiriiraan iskuulka ardaygooda si ay u helaan macluumaadka ku saabsan qorshaha iskuulkooda ee sanad dugsiyeedka 2020-21.

Macluumaadka hoose ayaa wuxuu sharxayaa rajooyinka la filayo ee ay MDH iyo MDE u dejiyeen iskuullada.

Hagaha Caafimaadka Bulshada

Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ku waa in ay waafaqaan talooyinka caafimaadka ee MDH inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Talooyinka waxaa ku jira waxqabadka ugu wanaagsan ee ku saabsan:

- Kala fogaanshaha bulshada iyo yaraynta isu gudbinta
- Daboolka wejiga
- Ilaalinta dadka nugul
- Ku dhaqanka nadaafada
- Nadiifinta
- La socodka jirrada
- Kiisaska COVID-19 ee la tuhunsan yahay ama la xaqiijiyey
- Nidaamka biyaha iyo laydhinta/hawo-mareenka
- Gaadiidka
- Taageerida caafimaadka maskaxda iyo fayaqabka

Haddii degmo iskuul ama iskuul charter ah ay ogaadaan inaysan awoodin inay waafaqaan dhaqamada caafimaad ee looga baahan yahay wax ku barashada shaqsi ahaanta loo imanayo ama mida isku dhafka ah, waa inay adeegsadaan wax ku barashada masaafada si wax loo baro ardayda oo dhan.

Go'aaminta nooca habka waxbarashada ee Ammaanka ah Bilowga Sanad Dugsiyeedka

Bulshooyinka ku nool gobolka Minnesota ayaa siyaabo kala duwan u wajahaya saameynta COVID-19. In kasta oo qaybo ka mid ah gobolka uu cudurku ugu faafay si balaaran, haddana bulshooyinka qaarkood waxay la kulmeen xoogaa ama tiro yar oo kiisas cusub ah. In kasta oo ay jiraan qodobo badan oo ay tahay in tixgelin la siiyo marka la dooranayo nooca habka waxbarashada ee la raacayo xiliga furitaanka iskuulka, habka go'aan qaadashadu waa in ay marka hore ku salaysantahay macluumaadka caafimaadka ee bulshada agagaaarka ku xeeran.

Kaddib marka la doorto nooca habka waxbarasho ee la qaadanayo bilowga sanad dugsiyeedka, go'aaminta in loo beddesho qaab waxbarasho oo kan ka duwan ayaa la samayn doonaa iyadoo lagu salaynayo saamaynta COVID-19 ee iskuulka iyo bulshada. Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ka ah ee tixgalinaya inay wax ka beddelaan nooca habka waxbarashada ee loo dejiyey iskuul ama degmada oo dhan waa inay sidaas sameeyaan haddii ay dan u tahay nabadgelyada shaqaalaha iskuulka iyo ardayda.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nooca habka waxbarashada ee ay iskuuladu dooran karaan ayaa waxaa laga heli karaa Hagitaanka loogu Talagalay Qoysaska - u Qorshaynta Sanad Dugsiyeedka 2020-21.

Daboolka wejiga

Daboolka wejigu waxay yaraysaa faafitaanka COVID-19. Dhamaan ardayda, shaqaalaha, iyo dadka kale ee ku jira dhismayaasha iskuulka iyo xafiisyada dagmada ama raacaya gaagiidka iskuulka ayaa waxaa laga rabaa in ay xirtaan daboolka wejiga. Shaqaalaha iskuulku waxay xiran karaan gaashaanka wejiga (caag aan midab lahayn oo daboolaya wajiga).

Daboolida wejiga waa in aan loo xirin qof ka yar da'da 2, qofkasta oo neefsashadu ay dhib ku tahay ama miyir beelay, qof tabar gabay ama haddii kale aan awoodin inuu iska saaro daboolka wejiga iyada oo aan la caawin, ama qof kasta oo aan u dulqaadan karin weji daboolka sababo la xiriira koritaanka, caafimaadka ama xaalada caafimaad ee hab dhaqanka.

Gobolka Minnesota wuxuu siin doonaa arday kasta oo K-12 ah iyo xubin kasta oo shaqaalaha iskuulka ah hal xabo oo weji dabool maro ah. Iskuul kasta waxaa sidoo kale uu heli doonaa saddex maaskaro ardagaygiiba iyo gaashaanka wejiyada oo loogu talagalay macallimiinta.

Qorshaha Ka Baaritaanka COVID-19

In kasta oo bulshada iskuulku ay ka shaqaynayaan ka hortagitaanka faafitaanka COVID-19, haddana kiisasaka waa laga heli karaan bulshada iskuulka. Haddii qof iskuulka ka mid ah looga shakiyo inuu qabo COVID-19 ama baaritaan lagaga helo COVID-19, iskuulku wuxuu ogaysiin doonaa Waaxaha Caafimaadka iyo Waxbarashada.

Baarintaan joogto ah in lagu sameeyo iskuulka la idinkulama talinayo. Baaritaanka waa inaan loo isticmaalin ku gelitaanka ama in uu noqdo qalab loo adeegsado isudiiwaangalin barnaamijyada loogu talagalay shaqaalaha, ardayda, ama qoysaska.

Gaarsiinta Qorshayaasha Ardayda iyo Qoysaska

Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ku waa inay la wadaagaan qorsheyaashooda waxku barshada shaqsi ahaan u imaanshaha, waxbarashada isku dhafan iyo wax ku barashada masaafada ay la wadaagaan ardayda iyo qoysaskooda ugu dambeyn hal asbuuc ka hor bilaabashada sanad dugsiyeedka 2020-21. Iskuulladu waa in ay ku wadaagaan macluumaadkan boggooda internetka.

Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ku waa in ay sameeyaan dhamaan iskudayada ay ku bixinayaan warbixinta hadal ahaan iyo qoraal ahaan luqadaha looga hadlo iskuulladooda. Qorshayaashu waa inay sharxaan sida iskuulladu ay ula xiriiri doonaan ardayda iyo qoysaska iyo sida ardayda iyo qoysaskoodu ay ula xiriiri karaan iskuulada. Iskuulladu sidoo kale waa inay wadaagaan sida ay u bixin doonaan waxbaridda, sida qoysasku ay ku heli karaan cuntada iyo daryeelka carruurta da'da iskuulka iyo macluumaadka ku saabsan baahiyaha teknoolojiyada.

Daryeelka Caruurta Da'da Iskuulka ah

Degmada iskuulka ama iskuulka charterka ah ee adeegsanaya nooc waxbarasho oo isku dhafan ama wax ku barashada masaafadu waa inay bixiyaan daryeel lasiiyo caruurta da'da iskuulka ah oo loogu talagalay carruurta da'doodu tahay 12 iyo kuwa ka yar kuwaas oo ah caruurta shaqaalaha muhiimka ah ee Tier I ee ku jira liiska shaqaalaha muhiimka ah ee gobolka. Caruurta shaqaalaha Tier I oo keli ah ayaa waxaa lagu daryeeli doonaa lacag la’aan inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee iskuulka.

Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ku sidoo kale waxay sii wadi karaan bixinta daryeelka kahor iyo kadib saacadaha caadiga ah ee iskuulka waxayna ka qaadi karaan kharash. Iskuullada loogama baahna inay bixiyaan daryeel xannaano inta lagu jiro maalmaha aan iskuulku furnayn.

Cuntada Iskuulka

Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ku waa in ay sidoo kale sii wadaan bixinta cuntada la siinayo ardayda inta lagu jiro maalinta iskuulka ilaa inta suurta gal ah.

Xulashada Wax ku Barashada Masafada

Dhamaan iskuullada degmooyinka iyo iskuullada charter-ku waa in ay siiyaan ikhtiyaarka wax ku barashada masaafada dhamaan qoysaska doorta in aysan waxbarashada shakhsi ahaan u imaanin sababo la xiriira halis caafimaad ama walwallo kale oo xaga ammaanka ah. Qoysaska loogama baahna inay keenaan caddaynta halista.

Helitaanka teknoolajiyadda

Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ka ee xaddida waxku baritaanka shakhsi ahaan ah ayaa waxaa lagu dhiirigelinayaa inay u oggolaadaan ardayda inay sii haystaan wixii qalab teknoolojiyad ah ee la siiyey inta ka hartay sanadka 2020-21. Degmooyinka iskuullada iyo iskuullada charter-ku waa in ay sidoo kale sii wadaan bixinta dayactirka teknoolajiyadan.